




Go'aan

- ✎ Ursula Nafula
- 🎤 Vusi Malindi
- 🗣️ Abdi Muse
- 💬 Somali
- 📊 Level 2







Tuuladayda waxay lahayd dhibaatooyin badan.
Waxaan samaynay saf dheer si aan biyo ooga soo
dhaansano tuubada.



Waxaan sugnay raashin ay nagu deeqeen dad kale.




Waxaan xirnay guryahanaga amin hore sababta oo ah tuugo.




Caruur badan ayaa dugsiga ka baxday.




Gabdhaha yaryar waxay ka shaqeeyeen sidii adeegto tuulooyinka kale.




Wiilasha yaryar waxay ku wareegeysteen agagaarka tuulada halka kuwa kale na ay ka shaqeeyeen beeraha dadka.



Markii dabayshu kacdo, waraaqaha qashinka ayaa ka lalmado geedaha iyo dayrarka.




Dadka waxaa jarjaray dhalooyin jajaban kuwaa oo loo tuuray si taxadar la'aan ah.




Kadib hal maalin, tuubada ayaa biyo la'aan laga dhigay weelashanadana faaruq bey ahaayeen.



Aabahay ayaa guri guri ugu tagay asagoo waydiinayo dadka in ay ka qayb galaan shirka tuulada.



Dadka waxay iskugu soo urureen geed wayna
hoostiisa wayna dhagaysteen.




Aabahay ayaa istaagay waxuuna yidhi, "Waxaan u baahanahay in aan wada shaqayno si aan u xallino dhibaatooyinkeena."



Juma oo sideed jir ah, oo kufadhiyo jirridda geedka ayaa ku qeyliyay, "Waan kaa caawin karaa nadiifinta."



Haweeney ayaa tiri, "Dumarka way igu soo biiri karaan si ay u beeraan cuntada."



Ninkale ayaa istaagay oo na yidhi, "Raggu waxa ay qodi doonaan ceel."



Dhammaanteen waxaan ku dhawaaqnay, “Waan ku qasbanahay in aan badejno nolosheena.” Maalintaas laga bilaabo waxaan ka wada shaqeynay inaan xallino dhibaatooyinkeena.



Storybooks Outline

global-asp.github.io/storybooks-outline

Go'aan

Written by: Ursula Nafula

Illustrated by: Vusi Malindi

Translated by: Abdi Muse

This story originates from the African Storybook (africanstorybook.org) and is brought to you by [Storybooks Outline](#) in an effort to provide children's stories in the world's many languages.



This work is licensed under a Creative Commons
[Attribution 4.0 International License](https://creativecommons.org/licenses/by/4.0/).